

## **Ballamaha Taleefanka WIC [www.healthvermont.gov/wicbyphone](http://www.healthvermont.gov/wicbyphone)**

Annagoo ka jawaabayna COVID 19, WIC waxay ku samayn doontaa ballamaha oo dhan taleefan si ay u waafajiso dadaalada kala fogaanta dadka ee Vermont. WIC waxa ka go'an inay siiso qoysaska taageero joogto hadda iyo maalmaha soo foodda leh.

Macluumaadka soo socdaa wuxuu ka caawin qoysaska WIC inay ku dhammaystaan ballamaha WIC taleefan.

### **Waxa la Filayo**

Qof ka tirsan shaqaalaha Nafaqada WIC ayaa kaala soo hadli doona taleefanka aad siisay xafiiska WIC ee deegaankaaga. Fadlan ogow in wicitaanadu ay ka iman karaan lambar gaar ah halkii ay ka iman lahaayeen lambarka adeegga WIC. Waxa lagu waydiin doonaa su'aalo taxan oo shakhsi ahaaneed, markaa raadso meel asturan oo deggan si aad ballanta u qaadata. Qofka shaqaalaha ah ee ka tirsan WIC wuxuu galin macluumaadka kombiyuutar, gaabis inta hadalku socdo.

### **Helitaanka Internetka**

Haddii ay suurto gal tahay, boggani ha kuu furnaado si ay kuugu fududaato inaad hesho macluumaadka loo baahan yahay inaad ku dhammaystirto ballanta. Sidoo kale waxa lagu sheegi karaa inaad sawirada dokumentiyada si elektaroonik ah ugu dirto iimeylka ammaanka ah ee xafiiska deegaankaaga. Qofka shaqaalaha ah ee ka tirsan WIC ayaa kuu sheegi doona waxa aad u baahan tahay inaad samayso si aad ugu qaadata ballanta taleefan.

### **Macluumaadka Kale ee Loo Baahan Yahay**

Haddii lagaaga qaaday cabbirada dhererka/joogga, culayska ama birta booqasho dhakhtar oo dhawayd, waad la wadaagi kartaa kuwan qofka shaqaalaha ah ee ka tirsan WIC. Haddii aan lagaa qaadin wax cabbirro ah, ballanta waxaad ku qaadan doontaa la'aantooda.

### **Xuquuqda iyo Masuuliyadaha WIC**

Ka qeyb qaate ahaan barnaamijka Hooyadam Dhallaanka, iyo Carruurta (WIC) waxaan fahamsanahay sida soo socoto:

1. Waqtiga cusboonaysiinta ee WIC-ga waa lagu kala duwanyahay iyadoo ku xeran nooca ka qeyb galaha:
  - a. haweenka uurak leh, ilaa lex isbuuc dhalmada kadib;
  - b. dhallaanka/dumarka naasnuujinaaya, ilaa laga gaarayo bisha uu ubadka sanad jirsanaayo.
  - c. carruurta, laga bilaabo marka uu gaaro 12 bilood ilaa da'da shanta sano; iyo
  - d. dumarka aan naaska nuujinayn ilaa lex bilood dhalmada kadib.
2. Goorta la gaaro xilliga ay idinkugu egtahay adiga iyo ubadkaaga, faa'idooyinka barnaamijka WIC-ga waa la joojinayaa.

3 Waxaan ka helayaa macluumaad ku saabsan nafaqadda iyo caafimaadka oo ay ku jirto in la kordhiyo aqoontaada xagga nafaqadda iyo kaalmaynta naa-nuujinta, cuntooyinka laga qaato WIC-ga iyadoona lagu gudbinaayo ama laguula socodsiiya adeegyada kale ee caafimaad.

4. Si aan la iiga joojin faa'idooyinka WIC-ga waa in aan xafidaa dhamaan ballamaheyga dib u cusboonaysiinta iyo kuwa barashada nafaqadda.

5. Waxaan xaq u leeyahay in macluumaadka aan la wadaagaayo barnaamijka WIC-ga laga dhigo kuwa qarsoodi ah oo aan cidna lala wadaagin. Waxaan fahamsanahay in macluumaadka ka qeybgalaha WIC-ga in laga yaabo in lala wadaago barnaamijyada soo socda: barnaamijka qolyaha guryaha soo booqdo, adeega korinta ilmaha aadan dhalin, talaalka, iyo ururka la socoshada qataraha uurka ee loo yaqaan (PRAMS). Saxeexayga elektarooniga waxa uu cadeynayaa in ogolahay aan fasax u siinaayo in macluumaadkeyga lala wadaago. Haddii loo baahdo in qolo kale lala wadaago macluumaadkaga waxaa loo bahaan doonaa oggolaanshahaaga.

6. Guddoomiyaha caafimaadka ee Vermont wuxuu oggolaana karaa isticmaalka iyo bixinta macluumaadkaaga ku saabsan ka qeybgalka WIC-ga in loo adeegsado arrin aan WIC-ga qusaynin. Macluumaadkaasina waxaa loo isticmaali doonaa xafiisyada dawladda iyo kuwa maxalliga ee WIC-ga iyo barnaamijyada aan kor ku soo xusnay kaliya maamulka barnaamijka, isku dubaridka gargaarka iyo barnaamijyada kale iyo horumarinta adeegyada WIC-ga iyo hawlihiisa.

7. Macluumaadka jinsiga/qowmiyadda ee la aruuriyay waxaa loo isticmaalayaa tiro koob ahaan wax sameynna kuma yeelan doonto ka qeyb qaadashadayda barnaamijka WIC-ga. Heerarka xaq u yeelashada iyo ka qeyb qaadashada barnaamijka WIC-ga waxaa wax dhamaan loo simanyahay iyadoo aan laga eegeyn jinsi, midab, asalka meesha aad ka soo jeedo, da'da, curyaan ah, ama nooca lab ama dhexdig I.W.M.

8. Shaqaalaha WIC-ga waxa ay xaqiijin doonaan macaluumaadkii aan siiyay. Haddii aan siiyo macluumaad aan sax aheyn xaq uma yeelan doono in aan hello faa'idooyinka WIC-ga, waxaana lagaa yaabaa in aan dib u bixiyo wixii kharashaad ahaa ee aan ku iibsaday cuntooyinka WIC-ga; waxaana la igu soo oogi karaa dacwad ayadoo la raacaayo sharciga gobolka iyo kan dowladda dhexe (federaal).

9. Haddii aan ka guuro Vermont waxaan codsan karaa xaqiijinta cadaaynta (VOC) si aan uga hello faa'idooyinka WIC gobolka cusub.

#### **Xaquuqda ka qeybgalaha barnaamijyada WIC-ga:**

- Haddii aan ku waafaqsanayn go'aan saameyn ku yeelan kara faa'idooyinkega ama xaq u lahaanshiyahayga WIC-ga, waxaan heystaa muddo 60 maalmood ah oo ka bilaabanaysaa maalinta aan helay ogaysiintaas in aan racfaan ka qaato oo aan weydiisan karo dacwad dhagaysi cadaalad ah oo ay aniga ama wakiilkayga sida qaraabo/saaxiib/la taliye dhinaca sharciga ama afhayeen kale u soo bandhigayaan sababta diidmada loo cuskaday.

- Macluumaadka ku saabsan dalabka dacwad dhagaysiga cadaalada ku dhisan waxaa laga helli xafiis walba oo maxalli ah ee WIC-ga ama xafiis gobolka ee WIC-ga: Vermont Department of Health, WIC Program, 108 Cherry street, PO Box 70, Burlington, VT 05402-0070. Waxaad sidoo kale naga soo wici kartaa si aad u dalbato dacwad dhagaysi taleefanka 1-800-649-4357.

- Sii wadida faa'idooyin ka waxa ay ku xernaan doontaa natiijada ka soo baxda racfaan dhagaysiga garsoorka. Waa in aan dalabkeyga gudbiyaa muddo 15 maalmood gudahooda oo ka bilaabanaysa

maalinta aan hello ogaysiiska ku saabsan inaan xaq u laheyn, si kastaba ha ahaatee, faa'idooyinka lama sii wado karo wax ka badan waqtiga loogu talagalay ka qeybqaadashada barnaamijka in ka badan.

- WIC-ga waa barnaamij fursadihiisa loo simanyahay. Haddii aan isleeyahay waxaa lagu geystay midabta koor sababa la xiriira jinsigeyga, midabkeyga, meesha aan soo jeedo, jinsiga, da'da ama curyaanimadayda, waxaan la xiriiri karaa Secretary of Agriculture, Washington, DC, 20250 si toos ah, ama waxaa ka codsan in arrinkaasi uu igu caawiyo shaqaale ka tirsan WIC-ga.

### **Mas'uuliyadaha ka qeybqaataha barnaamijyada WIC-ga:**

1. Si looga fogaado luminta faa'idooyinka WIC-ga waa in aad timaadaa dhamaan ballamahaaga.
2. Haddii aanan imaan karin ballan ii taala waa in aan soo wacaa waqti si dib la iigu dhigo ballanteyda. Haddii aan ka baaqdo (gooyo) ballan dib u cusboonaysiin ama mid fasalka barashada nafaqadda waxaa la yareyn doonaa faa'idooyinka WIC-ga ee la i siin jiray.
3. Haddii aan badalo cinwaankeyga guriga ama magaalo ama gobol kale aan u guuro waa in aan ku wargeliyaa shaqaalaha WIC-ga, si WIC loogu wareejiyo degmada ama gobolka kale.
4. Cuntooyinka WIC-ga waxaa loogu talagalay kaliya qoyska barnaamijkan ka qeyb qaadanaaya. Ma iibin doono mana siin doono cid kale haddii aan u baahdo in isbadal lagu sameeyo faa'idooyinka cunto ee aan ka qaato WIC-ga waxaa la xiriiri doonaa WIC-ga.
5. Isku badalida caanaha carruurta ee loo yaqaan Formula/cuntooyinka daawada waa in ay ka dhacaan xafiiska WIC-ga. Mid walba oo ka mid ah caanaha budada ee dhallaanka ee aan la isticmaalin waa in lagu soo celliyaa xafiiska WIC-ga.
6. Waxaan dhigan doonaa kaarkeyga WIC-ga meel aamin ah, mana la wadaagi doono macluumaadkeyga shaqsiga cid kale oo aan ka aheyn qofka xaq u leh in uu iigu soo adeego kaarka WIC-ga ahna qof guriga igala tirsan ama wakiil mooyee.
7. Haddii uu iga lumi ama la iga xado kaarkeyga WIC-ga ee Vermont, Waxaan islamarkiiba ku wargeliing doonaa xafiiska WIC-ga. Waxaa suurtagal ah in hellin faa'idooyinka bishan oo aan la ii badallin.
8. Waan ogsoonahay in faa'idooyinka WIC-ga kalliya aan kaga dukaamaysan karo dukaamada la ogolyahay in WIC-ga looga dukaamaysto inta lagu jiro bisha markaasi la joogo uuna ku dukaamaysto qofka loo soo daabacay kaarka WIC-ga, faa'idooyinka bisha ee aan la isticmaalin lama isticmaali karo bilaha kale.
9. Waxaan mas'uul ka ahay in u tababaro qofka kale ee guriga igala tirsan ama wakiilka sida loogu isticmaalo kaarka marka dukaanka looga adeeganaayo.
10. Waxaan mas'uul ka ahay in qofka kale ee kaarka ku adeegaayo uu ku dhaqmo mas'uuliyadaha aniga i saaran oo kale.

Sababaha keeni keeni kara in aadan u qalmin, lagaa xanibo, lagu ganaaxo iyo in lagaa dalbo in aad dib lacag u soo celiso:

- A. In aad si qalad ah u isticmaasho faa'idooyinka WIC-ga sida iskubadalasho/iibin ama aad kula talo jirto in aad iibiso kaarka ama cunto kaarka WIC-ga Vermont ama ama in aad afka ka iibiso faa'idooyinka WIC-ga si online ah, ama hab kasta oo kale oo lacag caddaan ah, kaarka credit-ka ama aad ku iibsato waxyaabo aan cunto aheyn.
- B. In aad ku iibsato cuntooyinka aan ku jirin liiska cuntooyinka la ogolyahay ee WIC-ga;
- C. Xadgub jir ahaaneed, handadaada xadgudubka jir ahaaneed, ama xadgudub afka ah oo loo geysto shaqaalaha WIC-ga ama Shaqaalaha dukaanka.

Warbixinta maaliyadeed iyo tan xaq u yeelashada ee aan idin siiyay waa mid sax ah oo ku dhisan aqoonta aan u leeyahay dhaqliga qoyska, tirada xubnaha qoyska, cinwaanka guriga, warqadaha

aqoonsiga, iyo macluumaadka ku saabsan caafimaadka iyo nafaqadda. Haddii uu intaas isbadal ku yimaad waxaan ku wargellinayaa shaqaalaha WIC-ga, anigoo bixinaaya saxiixayga elektarooniga ah ee nidaamka VT WIC Ceres, Waxaan xaqiijinayaa waxyaabaha soo socda:

1. Waan ogolahay waxyaabaha iyo weedhaha kor ku xusan;
2. Waxaa la igala taliyay la ina fahamsiiyay la iina akhriyay la iina soo bandhigaya in aan qaadan karo nuqul ka mid ah barrnaamijka WIC-ga ee VT xaquuqda ka qeybgalaha iyo waajibaadka iyo dabakhida ogaysiinta ilaha xogta.

Sida waafaqsan sharciga caquuqda madaniga iyo kan federaalka iyo kan Wasaarada beerha Maraykanka (USDA) xeerka madaniga iyo siyaasada, USDA hay'adaheeda, xafiisyadeeda iyo shaqaalaheeda iyo ka qeybgalyaasheeda, hay'adaha ka qeybta ah maamulada barnaamijyada waxaa ka mamnuuc ah midabtakoorka ku salaysan, Jinisga isirka, nooca qofka, curyaanimada, da'da ama aargoosiga dhamaan barnaamijyada ama barnaamijyada ay maalgeliso USDA.

Dadka naafadda ah ee u baahan in lagula xiriiro qaab kale marka la siinaayo macluumaad ku saabsan barnaamijka (Tusaale: farta waaweyn ee taabshada lagu aqriyo, cajalad, luuqada astaamaha ee Maraykan (Tan dhagoolayaasha) I. W. m.), waa in ay la soo xiriiraan hay'ada (gobolka ama maxaliga) meesha ay arjigooda u gudbiyeen markii ay arjiga u qorayeen faa'idooyinka, dadka dhagaha la' ama maqalka ku adagyahay ama baahi gaar ah ka qaba dhinaca hadalka waxa ay la xiriira karaan USDA iyagoo adeegsanaaya adeega la isku haleyn karo ee federaalka taleefanka (800) 877 -8339. Waxaa intaas dheer in macluumaadka ku saabsan barnaamijka lagu hello karo luuqadaha kale ee aan Ingiriisiga aheyn.

Si aad u gudbisid ashtako ku saabsan barnaamijka, waxaa lagaaga baahanyahay in aad buuxisid foomka ashtakada ee barnaamijka USDA ee loo yaqaan (AD-3027) oo aad ka helli karto:

[http://www.ascr.usda.gov/complaint\\_filing\\_cust.html](http://www.ascr.usda.gov/complaint_filing_cust.html) ama xafiis walba oo ay leedahay USDA, ama waxaad soo qori kartaa warqad aad u dirayso USDA waxaadna ku xusi kartaa warqadda dhamaan macluumaadka aad ku dalban lahayd foomka. Waxaad wici kartaa si aad u codsato in lagu soo diri foomka ashtakada taleefankan (886) 632 -9992. Ku soo hagaaji foomkii aad soo buuxisay ama warqadda cinwaanka USDA oo ah:

- |            |  |
|------------|--|
| (1) mail:  | U.S. Department of Agriculture<br>Office of the Assistant Secretary for Civil Rights<br>1400 Independence Avenue, SW<br>Washington, D.C. 20250-9410; |
| (2) fax:   | (202) 690-7442; or   |
| (3) email: | program.intake@usda.gov.   |

Hay'addani waa bixiye fursaddiisa loo siman yahay.

### **Khayraadka Ballanta**

Wixii su'aalo iyo macluumaad la xiriira naasnuujinta, booqo [Bogga Naasnuujinta WIC](#)

Macluumaadka kusaabsan cuntooyinka WIC, booqo [Bogga Tukaamaysiga WIC](#) , fiiri [Hagaha Cuntooyinka WIC ee Vermont](#) iyo [Hagaha Barnaamijka iyo Tukaamaysiga WIC](#)

Si aad u dhammaystirto hawlaha Waxbarashada Nafaqada ee onlaynka ah, booqo [WICHealth.org](#)